

Baaritaannada Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn (APS)

Xaashida Xaqiiqda

Adult Protective Services (APS) Investigations Fact Sheet

Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waa baaritaan lagu sameeyo warbixin ay dhici karto in adiga laguugu xadgudbey, lagu dayacey, dhaqaale ahaan lagaaga faa'ideystay, ama katagtey qof weyn oo daciif ah. Dukumeentigaan wuxuu kugu wargelinayaahab socodka baaritaanka, xuquuqahaaga, iyo macluumaad kale oo muhiim ah. Sida qayb kamid ah baaritaanka, Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waxay muraajaco kusamayn doontaa diiwaanada waxayna wareysi layeelan doontaa dadka kulug leh eedeym(aha).

Natiijada ka soo baxda baaritaanka waxay kugu yeelan kartaa cawaaqib halis ah. Fadlan u akhri arintaan sitaxadar leh.

Baaraaha loo xilsaarey dacwadaada ama kiiskaaga waa:

Waxaa lagala xiriiri karaa:

Maxay yihin xuquuqaha aan leeyahay?

- Adiga waxaad xaq u leedahay in aad lahaatid oo kula socdo qayb seddexaad (sida saaxiib, qareen, urur wakiil ah, xubin qoyska kamid ah, ama welii) inta lagu guda jiro wareysiga.
- Haddii luuqada Ingiriiska aanan ahayn luuqadaada aasaasiga ah, waxaad xaq u leedahay turjumaan lacag la'an ah (Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn (APS) ma ogola in loo isticmaalo xubnaha qoyska sida turjubaano).
- Waxaad xaq u leedahay in aadan ka qaybgalin wareysiga, in aad joojisid, ama in aad dib u dhigatid.
- Waxaad xaq u leedahay in aad siisid Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn (APS) dukumeentiyada ama markhaatiyaasha laxiriira eedaymaha.

Sidee ayay Adeegyada Ilaalinta dadka waaweyn (APS) iigu soo wargelinayaan natijada ka soo baxda baaritaanka?

- Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn (APS) waxay qaadanayaan go'aan ku salaysan caddeymaha ay ka soo ururiyeen Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn (APS) inta lagu guda jiro baaritaanka. Noocyada go'aannada ay qaataan Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn (APS) waa:
 - **La-xaqiijiyey:** U baddantahay in aanan ahayn dhacdada la eedeeyay ee dhacday
 - **Aan-laxaqiijin:** U baddantahay in aanan ahayn dhacdada la eedeeyay ee aanan dhicin
 - **Aan-dhameystirnayn:** Ma go'aamin karaan haddii ay dhacday ama aysan dhicin dhacdada eedaynta.
- Haddii Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) ogaato in ay u baddantahay in dhacdadaasi aanan ahayn mid dhacdey, Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waxay kuugu soo wargelin doontaa in ay kuusoo dirto warqad ruqsadaysan iyo boosto caadi ah.
- Haddii Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) ogaato in ay u baddantahay in dhacdadaas aanan dhicin, Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waxay kuugu soo wargelin doonaan qaab hadal ah. Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waxay kusiin kartaa warqad haddii aad codsatid.
- Haddii Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) aanan xaddidi karin ama go'aansan karin haddii ay dhacdadu dhacday iyo haddii kale, Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waxay kuugu soo wargelin doontaa qaab hadal ah. Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) waxay kusiin kartaa warqad haddii aad codsatid.
- Haddii Adeegaha Ilaalada Dadka waaweyn (APS) aanan haysan cinwaankaaga hadda ah, waxay u dirayaan warqada cinwaan khaldan, adigana waxaa dhici karta in aad sidaasi kuweysid ballamada kama dambaysta muhiimka ah.

Maxay tahay macnaha hellida la-xaqiijiyay?

Haddii Adeegaha llaalada Dadka waaweyn (APS) go'aansato eedaymaha xad gudubka, dayacida, kategida, ama kafaa'ideysiga dhaqaale ahaan in ay yihiin "kuwo laxaqiijiyey", waxaad codsan kartaa dhagaysi maxkamad haddii aadan ogolayn waxa lahelay. Haddii go'aanka Adeegaha llaalada Dadka waaweyn (APS) lataageero ugu dambeysta hab socodka dhagaysiga maxkamada, magacaaga waa ladiiwaan gelin doonaa.

In lagu diiwaan geliyo macnaheedu waxay tahay in aadan awood u lahayn in aad kashaqeyso ama kaqabato shaqo iskaaga ah meelkasta oo ay dhici karto in aad kuleedahay xiriir aan ilaalin lahayn oo aad layeelato dadka waaweyn ee dacifka ah ama caruurta. Hadda majirto qaab looga saari karo magacaaga diiwaan gelinta.

Ma beddeli karaa go'aanka Adeegyada llaalinta Dadka Waaweyn (APS)?

- Haddii Adeegyada llaalinta Dadka Waaweyn (APS) ay go'aansadaan in dhacdada eedayntu ay tahay **mid aan la-xaqiijin** ama **mid aan dhameystirnayn** adigu uma baahnid in aad wax sameyso.
- Haddii Adeegyada llaalinta Dadka Waaweyn (APS) ay go'aansadaan in dhacdada eedaynta ay tahay **mid la-xaqiijiyey** adigana aadan oggolaanin waxaad codsan kartaa dhageysi. Warqada Adeegyada llaalinta Dadka Waaweyn (APS) ayaa kuu sheegi doonta sida loo sameeyo.

Si aad dhageysi u codsato, waxaad keliya haysataa ilaa 5:00 galabnimo (p.m.) maalinta 30aad ee kalandarka ka-dib taariikhda warqadda ogeysiiska ee waaxda boostada lagu diro ama shakhsiyaad adiga laguu siiyo, habka kii hordhaca.

Wixii Macluumaad Dheeri ah

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan APS internet-ka <https://www.dshs.wa.gov/altsa/adult-protective-services-aps>.